



## Qorshaha Aag-koobanaha North Highline (White Center) Dulmarka Hindisaha Kowaad

### Qorshaha aag-koobanuhu waa...

Qorshe isticmaal dhul oo faahfaahsan oo loogu talagalay dhul yar, oo xadaysan. Qorshooyinka aag-koobanaha ayaa ku nuuxnuuxsanaya arrimaha isticmaalka dhulka sida sooneynta (zoning), isticmaalka dhulka muddada-dheer, iyo mowduucyo kale oo la xiriira sida dhulka looga isticmaalo aagga sida aagag guryiyayn, ganacsiyeed iyo warshadeed, iyo astaanta beesha.

### La xiriirka bulshada

Qorsheeyaasha deegaanka (county) ayaa ka qaybgalay in ka badan 20 kulan oo dadwayne intii u dhaxaysay bilihii Julaay iyo Oktoobar 2019 si ay ula wadaagaan dadka aqoonta ku saabsan isticmaalka dhulka iyo sooneynta oo ay ogaadaan qiyamka iyo ahmiyadaha bulshada. Qorsheeyaasha ayaa walibana ka helay in ka badan 100 ra'yi-celin sahan ku saabsanaa isticmaalka dhulka. Qorsheeyaasha ayaa soo saaray qabyo-qoraalka fikradaha ee hawlgalkan.

### Qiyamka bulshada ee muhiimka ah

- Kala duwanaanshaha iyo ka-qaybgalinta
- Xadiiqooyinka iyo goobaha cagaaran
- Dareen “magaalo yar”
- Awoodidda guriyeynta
- Taageeridda beesha meheradaha yaryar ee deegaanka ka jira
- Isku-filnaanta iyo fikrado cusub abuurka fiican

### Ahmiyadaha beesha ee muhiimka ah

- Awoodidda guriyeynta
- Fursadaha dheeriga ah ee guriyeynta
- Meelaha waddada dinac-socodyada / lugaynta dadka loogu talagalay
- Ka hortagga barakaca
- Ilaalinta astaanta xaafadeed

### Guriyeynta – fikradaha qoraal-qabyada ah

- Kordhinta fursadaha guriyeynta ka jira badiyaa xaafadaha guryaha qoyska-kaliya ee u dhow gaadiidka dadwaynaha iyo meelaha ganacsiga
- Dhiirrigelinta horumarinta cusub ee u dhiganta baaxadda xaafadaha ku xeeran
- Dhiirrigelinta dhisidda aqallo guriyayn la awoodi karo oo ku yaal bartamaha magaalada (16th Avenue SW)

### Ganacsiga iyo warshadaha – fikradaha qoraal-qabyada ah

- In la dhiirrigeliyo ku samaynta dhismayaasha leh meelo la lugayn karo oo isticmaal-iskujir leh (meheredda iyo guriyeyntaba) aagga ganacsiyeed oo ee u dhow 16th Avenue SW
- Ka takhaluska aayarta ah ee u isticmaalka dhulka qaybaha warshadeed gudaha bartamaha magaalada White Center; oo la dhiirrigaliyo dhismayaasha isticmaal-iskujir leh

### Tixgelinno dheeraad ah

Isbeddellada xeerarka isticmaalka dhulka ayaa ku dambayn kara natiijooyin kala duwan oo faa'iido u yeelan kara kooxaha qaarkood oo dhibaato u keeni kara kuwa kale. Qorsheeyaasha deegaanka waxay daraasad ku sameynayaan saamaynta suurtagalka ah ee isbeddeladan waxayna ku dhiirrigelinayaan bulshada inay gacan ka geystaan sidii loo ogaan lahaa mowduucyo dheeri ah oo la tixgaliyo.



## Kaalinta bulshada

Qorsheeyayaasha ayaa ku sii wadi doona inay kala shaqeeyaan bulshada sidii loo horumarin lahaa hindisayaasha hore kahor inta aan la siidaynin qoraalka dhammayskatiran ee Qorshaha bisha Maarso. Ka qaybgalinta dadwaynaha waxa ka mid ah shirarka dadwaynaha iyo ra'yi-ururin lagu qaban doono barta <https://bit.ly/2Za2cZV>. Si aad iskugu qorto arrimo la socodsiiinta emaylka oo aad u aragto dukumiintiyada kale ee qorshaynta, booqo [www.kingcounty.gov/northhighlineplan](http://www.kingcounty.gov/northhighlineplan)

## Qorshaha Aag-koobanaha North Highline (White Center)

### Muddo-Wakhtiyeedka Mashruuca

#### Julaay – Oktoobar 2019

*La xiriirka hore ee bulshada – barashada bulshada iyo ahmiyadaheeda*

- Soo hordhigga albaabbada furan ee bulshada
- Shirarka kooxda ahmiyad saarka iyo kooxda xaafadda
- Ra'yi-ururinta onlaynka ah

#### Noofambar 2019

*Deegaanka ayaa soo saari doona qabyo-qoraalka kowaad*

#### Disember 2019 - Janawari 2020

*U fiirsiga bulshada ee qabyo-qoraalka kowaad*

- Soo hordhigga albaabbada furan ee bulshada
- Shirarka kooxda ahmiyad saarka iyo kooxda xaafadda

#### Febrawari 2020

*Deegaanka ayaa soosaari doona qabyo-qoraalka kowaad ee dadwaynaha*

#### Maarj 2020

*Qoraalka qabyada ah ee dadwaynaha loo sii daaday*

#### Abriil – Mey 2020

*Deegaanka ayaa soosari doona, iyo u fiirsiga bulshada ee, qoraalka kama dambayska ah*

- Soo hordhigga albaabbada furan ee bulshada
- Shirarka kooxda ahmiyad saarka iyo kooxda xaafadda

#### Juun 2020

*Qorshaha Aag-koobanaha ayaa loo gudbin doonaa golaha King County Council*

**In dheeri ah kaga ogow arrinta: [www.kingcounty.gov/northhighlineplan](http://www.kingcounty.gov/northhighlineplan)**